

Sicirrada tabarruca

Sicirka xubnimada Usdaw waxuu ka mid yahay kuwa ugu hooseeya dhaqdhaqaaqa ururrada shaqaalaha, waxaana laga helaa faa'iidooyin iyo adeegyo xirfad leh oo heer sare ah kuwaasoo laga bixiyo xoogaa beni oo keliya maalintii.

Si aad macluumaad dheeraad ah u hesho ama si aad Usdaw ugu biirto:

- La xiriir wakiilkaaga Usdaw
- La xiriir xafiiska Usdaw ee xaafaddaada

0800 030 80 30

- Booqo bartayada internetka

www.usdaw.org.uk

Macluumaadka buugyarahan ku jira waa sax taariikhda la daabacayo – July 2017.

U*s***d***a***w**
*Union of Shop, Distributive
and Allied Workers*

Waxaa soo saaray Usdaw
188 Wilmslow Road
Manchester M14 6LJ

Ma Waxaad Dareensan Tahay...

Cidla?

**In aadan hubin xuquuqda
aad shaqada ku leedahay?**

**In aad gargaar rabto si
aad af Ingiriisiga u barato?**

**Urdaw ayaa ku caawin kara –
waxaan nahay ururkaaga shaqaalaha.**

U*s***d***a***w**
*Union of Shop, Distributive
and Allied Workers*

**Lix sababood oo ay ku fiican tahay in aad Usdaw ku biirto
Somali – ururkaaga shaqaalaha.**

Lix sababood oo ay ku fiican tahay in aad Usdaw ku biirto...

- 1 Waxaan xubnahayaga ka caawinnaa in ay ka war helaan xuquuqda ay shaqada ku leeyihiin. Tusaale ahaan, miyaad ogayd in aad xaq u leedahay:
 - Mushaarka ugu yar ee qaangaarka. Waxuu kaasi kordhaa sanad walba oo tan iyo maalintii 1 Abriil 2017 waxuu tagnaa:
 - £7.50 saacaddii dadka 25 jir ah ama ka weyn
 - £7.05 saacaddii dadka da'doodu u dhexeyso 21-24
 - £5.60 saacaddii dadka da'doodu u dhexeyso 18-20
 - £4.05 saacaddii dadka da'doodu u dhexeyso 16-17
 - fasax mushaar leh oo 28 maalmood ah sanadkii (qofka shaqeeya 5 maalmood toddobaadkii).
 - nasasho 11 saacadood ah maalintii.
 - Shaqaalaha intooda ugu badan waxay xaq u yeeshaan mushaarka jirrada ka dib marka ay saddex maalmood bukaan.
- 2 Waxaan aqbalnaa dhibaatooyinka xubnahayagu ka qabaan maamulka waxaanan kaaga doodnaa dhegeysiyada edbinta.
- 3 Waxaan xubnahayaga siinnaa talo iyo matalaad sharciyeed oo BILAASH ah haddii shil ka qabsado shaqada, si aanan caddaali ahayn loo eryo takoorna loo geysto.
- 4 Waxaan xubnahayaga ka caawin karnaa in ay tababar BILAASH ah ka helaan mawduucyo aad u kala duwan sida af Ingiriisiga, Xisaabta iyo xirfadaha kumbiyuutarka.
- 5 Waxaan u ololaynaa ka hortagga cunsurnimada waxaanan u doodnaa in shaqaalaha dhammaantood si isku siman loola dhaqmo.
- 6 Waxaan ka shaqaynaa wanaajinta mushaarka xubnahayaga iyo nolosha ay shaqada ku leeyihiin.

- Qof walba ayaa urur shaqaale ku biiri kara.
- Waxaad sharci ahaan xaq u leedahay in aad urur shaqaale ku biirto.
- Waajib kuguma aha in aad loo-shaqeeyahaaga u sheegto in aad urur shaqaale xubin ka tahay.
- Waa sharci darro in qof adiga takoor kuugu geysto xubnimada aad urur shaqaale ugu jirto.